# OGEYSIIN KU SAABSAN TIIBISHADA IYO BAARITAANKEEDA

Maxat tahay sababta laguusiiyey ogeysiintan?

Finland cudurka tiibishada waa mid aad oogu yar. Daaweyn fiican darteed ayaa inta badan cudurkan lagu tirtitay. Waxaad katimid waddan dadka badanaa ama qaarkiis ay u jiradaan cudurka tiibishada. Waxaa laga yaabaa in aad qabtid tiibishada oo adoo ogeyn ay dadka kuu dhawi kaa qaadi karaan. Caafimaadkaaga iyo dadka kuu dhow dhow caafimaadkooda waxaa muhiim u ah in haddii aad qabtid tiibishada si dhaqso ah loo ogaado si lagaaga daweeyo.

Finland waxaa ladoonayaa in caafimaadka ajaanibta ladaryeelo. Sababtoo ah waxaad dooneysaa in aad in kabadan seddex bilood joogtid Finland, waxaad xaq u leedahay in sawirka sambabada ”Raajitada” lagaa qaado. Sawirkaas ma aha mid lagugu qasbayo. Sawirka sambabada waxaa lagu ogaanayaa in aad tiibishada qabtid calaamadahooda.

Sawirka sambabada ”Raajitada”

Tiibishada sambabada waxaa lagu ogaadaa sawirka sambabada ”Raajitada” sawirakaas waa mid ammaan ah. Qofka uurka leh waa in uu sheegaa in uu uur leeyahay inta aan sawirka lasaarin. Qofka dumarka ah ee uurka leh oo aan lahayn xanuun kale waxaa sawirka laga qaadayaa bilaha uurka u dambeeya.

Sawirka sambabada ”Raajitada” waxaa lagaaga qaadayaa magaalada aad deggan tahay xarunteeda caafimaadka, sawirkaasna waa mid lacag la`aan ah. Haddii sawirkaas sambabka uu kaduwan yahay sambabada kale waa lagula soo xariirayaa, waxaana laguu dirayaa baaritaano kale.

Sida oogu dhaqsaha badan isugu soo siiwan geli in sawika sambabada ”Raajitada” lagaa qaado!

Ogeysiintaan tus xarutaada caafimaad / kalkaalisada raajada.

Macluumaadka xaruta caafimaadka / raajada: ______________________________________________

______________________________________________________________________

Calaamadee lagu gartaa tiibishada?

Tiibishada sambabada waxa oogu muhiinsan ee lagu garto waa qufac muddo dheer kuhayey in kabadan seddex wiik, kaaso o waqti kadib isu badala xaaqo. Marka aad qufacaysi waxaa laga yaabaa in qufaca uu sooraaco xaaqo jaalle,  bunni, ama uu yahay qufac dhiig wata. Cudurka markuu kugu faafana waxa uu keenaa in neeftu kugu dhegto iyo laab xanuun.

Qofka qaba tiibishada waxa uu yeeshaa qandho badan, in uu qofku caatoobo iyo dhidib badan oo habeenkii ah, waxaa laga yaabaa in uu cunta cunidu yaraato oo uu tabar beelo. Calaamaduhu waa kala nooc waxa ay ku xiran tahay jirkiisa ama uur kujirtiisa qayntee baa jiran.

Carruurtu cudurka tiibishada waxa uu u keenaa in kobocooda iyo koritaankooda uu daahiyo.

Maxaad samaynaysaa haddaad hadda ama mardambe aad isku aragto calaamada tiibishada?

Si degdeg ah oola xariir xarunta caafimaad ee xaafadaada. Waa lagama maarmaan in dhaqtarku kubaaraa. Baaritaanka dhaqtarku waa lacag la`aan. Baaritaankan maha mid ay Xafiiska socdaalka ”Ima gareeshinka” uu ogaanayo.

Maxay tahay tiibishadu?

Tiibishadu ma aha mid aad adiga isukeeneysid. Tiibishadu waa cudurada lagala qaado. Cudurkana waxaa keena bakteeriyada loo yaqaan *Mycobacterium tuberculosis*. Inta badan tiibishadu waxa ay ku dhacdaa sambabada waxa ayna ka samaysataa deggaan jeermis ah, jeermiskaas oo ku faafa dhiigga ama dheecaanada waxa uuna ugudbaa jirka sida qanjirada, xiidmaha, maqaarka ama neerfooyinka, waxaa lagayaa in iskumar tiibishada ku dhacdo sambabada iyo jirka intiisa kale.

Sidee tiibishada loo qaadaa?

Tiibishada waxaa loo kalaqaadaa neefsashada hawada qof neeftiisa qof kale. Bakreetiyada tiibishadu waxa ay ku faafaysaa hawada, marka uu qof qaba tiibishada sambabada uu hadlo, uu heeso, uu qufaco ama uu hindhiso. Markaas waxaa laga yaabaa in qofka qolka ama meesha lajoogo uu bakteeriyadii ay sambabadiisa ku faafto marka uu hawada qaato. Dadka wax badan meel la joogo qofka qabdo jiraan waxaa laga yaabaa in uu qaado. Qatarta oogu weyn ee lagu qaado waa qoyska isla deggan haddii qof kamid ah qabo cudurkan tiibishada.

Yaa u xanuunsada tiibishada?

Dadka qaada tiibishada tobankii qofba hal qof ayaa cudurkan tiibishada u xanuunsada. Cudurkan waxaa si fudud oogu xanuunsada xarruurta kayar 5-sano, dhalinyadada qaangaarka ah, dadka waayeelka ah, dadka uu jirkoodu ku yar yahay iska difaacidda cudurada.

Sidee ayey si daqso ah isku badashaa tiibishadu cudur ama jiro?

Carruurta ka yar 5-sano een laga tallaalin tiibidhada marka ay qaadaan tiibishada waxa ay cudur ahaan ama jiro isku badashaa marka ay qaadeen wiig kadib ama bil kadib, cudurkana si deg deg ah ayuu oogu faafaa. dadka qaan gaarka ah ee sidooda kale caafimaad qaba, waxa tiibishadu isu badashaa cudur ama jiro sida caadiga ah sanad ama laba sano. Tiibishadu waxaa laga yaabaa in marka aad qaado ay curud ama jiro isu badasho toban sano kadib. Xusuusnow calaamadaha lagu garto tiibishada.

Meeshee iyo sidee baa loobaaraa tiibisgada?

Baaritaanka waxaa laga bilaabayaa xarunta caafimaadka, xarunta daryeelka caafimaadka ardayda, ama xarunta daryeelka caafimaadka shaqaalaha. Baariaanka waxaa laga sii wadaa isbitaalka. Carruurta waxaa lagu baaraa isbitaalka qaybta cudurada carruurta ama qaybta daaweynta. Dadka waaweyn ee qaba tiibishada sambabada waxaa lagu baaraa isbitaalka qaybta cudurada sambabada ama daweynta.

Hadii laga shakiyo in aad qabto tiibishada sambabada waxaa baatiraanka laga bilaa in sambabada sawir laga qaaro ”raajito” xaaqo lagaa qaado oo labaaro. Xaaqadaas waxaa lagu sameeyaa midabeynta tiibishada waana labeeraa. Haddii loobaahdona xaaqadaas waxaa lagu sameeyaa baaritaan dhaqso ah oo tilmaamaya hida sidaha tiibishada.

Mar mar waxaa loobaahdaa in tuumbo lagu geliyo oo sambabada la fiiriyo ama sawir laga qaado laablaabyada sambabada. Marka tiibishada laga baarayo meel aan ahayn sambabada, waxaa lasameeyaa oo la isticmaalaa hababa kala duwan, waxaa kaloo lasameeyaa xubinta cudurka uu ku dhacay waxaa laga qaadaa cad tijaabo ah ama dheecaan.

Habkee tiibishada loo daweeyaa?

Tiibishada waxaa lagu daweeyaa daawooyin. Marka hore daawooyinku waa ugu yaraan afar daawood. Tiibishada caadiga ah waxa ay daaweyteeda qaadataa ugu yaraan lix bilood. Tiibishada si wanaagsan baa looga dawoowaa, waa haddii waqti fiican cudurka la ogaado oo daaweyntii sidii loodu talagalay noqoto. Finland daaweynta tiibishada waa ay ku wanaagsan tahay daaweyntaasna waa lacag la`aan ama bilaash.

Halkan ka aqriso macluumaad dheeri ah oo tiibishada ah: [www.tuberkuloosi.fi](http://www.tuberkuloosi.fi)